Utdannings-
direktoratet

# NIDAAMKA WAXBARASHADA NORWAY

## LAGA SOO BILAABO XILLIGA HORE EE XANNAANADA ILAA LAGA GAARAYO DHALINYARONIMADA

Macluumaad loogu talagalay waalidiinta iyo masuuliyiinta dhawaan yimid ee

## MAWDUUCYADA

Waxbarashada xilliga hore ee xannaanada iyo daryeelka (da'aha 0–6) Afka norwiijiga waxaa loo yaqaanaa: barnehage ..... 3

Waxbarashada dugsiga hoose iyo tan dugsiga dhexe (da'aha 6–16) afka norwiijiga waxaa loo yaqaanaa: grunnskole ..... 3
- Xaqa iyo waajibaadka aad ku dhigan karto dugsiga hoose iyo kan dhexe ..... 4
- Qiimaynta iyo darajaynta ..... 4
- Barnaamijyada xilliga dugsiga kahor iyo kadib (afka norwiijiga waxaa loo yaqaanaa: SFO) ..... 4

Waxbarashada dugsiga sare ee dhalinyarada (da'aha 16-24) afka norwiijiga waxaa loo yaqaanaa: videregående opplæring ..... 4
- Codsashada dugsiga sare ..... 5
- Barnaamijyada loogu talagalay daraasaadka guud (afka norwiijiga waxaa loo yaqaanaa: studieforberedende utdanningsprogram) ..... 5
- Barnaamijyada waxbarashada xirfadeed (afka norwiijiga waxaa loo yaqaanaa: yrkesfaglige utdanningsprogram) ..... 6

Xuquuqda ay leeyihiin ardayda oo dhan ..... 6
- Tabbabarka luuqada gaarka ah ..... 6
- Taageerada hordhaca ah ee dugsiyada hoose, dhexe iyo sare ..... 7
- Waxbarashada gaarka ah ..... 7
- Deegaan waxbarasho oo amaan qabo oona wanaagsan ..... 7
- Iskaashiga ka dhexeeya dugsiga iyo guriga ..... 7

## WAXBARASHADA XILLIGA HORE EE XANNAANADA IYO DARYEELKA (DA'AHA 0–6) AFKA NORWIIJIGA WAXAA LOO YAQAANAA: BARNEHAGE

Inta badan carruurta Norway waxay dhigtaan waxbarashada hore ee xanaanada iyo daryeelka, oo inta badan loo yaqaano xannaanada, ilaa ay bilaabaan dugsiga sanadka ay galaan 6.

Caruurta dhigta dugsiga xanaanada waxaa xanaaneeya shaqaale aqoon u leh oo fududeeya waxbarashada, ciyaarta iyo hawlaha bulsheedka iyo dhaqameedka ee kala duwan. Dugsiga xanaanadu carruurtu waxay ku qaataan waqti gudaha fasallada iyo dibaddaba. Dugsiga xanaanada ayaa muhiim u ah luqadda carruurta, kobaca bulsheedka iyo jireedka.

Wadashaqeynta iyo wadahadalka u dhexeeya waalidiinta ama mas'uuliyiinta iyo dugsiga xanaanadu waa lama huraan. Dugsiga xanaanadu wuxuu u baahan doonaa macluumaad ku aadan asalka ubadka, sida luqadaha hooyo iyo kuwa kale ee lagu hadlo, xiisaha iyo caqabadaha suurtagalka ah, si wax ku ool ah uu u daboolo baahiyaha ilmaha. Dugsiga xanaanada waxa kale oo uu siin doonaa waalidka/mas'uulka macluumaadka ku saabsan hawl-maalmeedka iyo horumarka ubadka.

Dhammaan carruurtu waxay xaq u leeyihiin inay helaan deegaan badbaado leh oo caafimaad qaba inta ay joogaan dugsiga xannaanada. Dugsiga xanaanada waxa uu horumariyaa bulsho loo dhan yahay waxuuna ka hortagtaa cagajuglaynta iyo dhaqamada kale ee waxyeelada leh. Haddi cunug lagula kaco cagajugleyn ama dhaqamo kale oo waxyeelo leh oo kaga yimaada caruur kale ama dad waa wayn, xanaanada waxa ku waajib ah inay qaado talaabooyin ay kaga jawaabayso.

Carruurta leh baahiyaha gaarka ah waxay xaq u yeelan karaan taageero iyo hagitaan waxbarasho oo gaar ah. Tani waxay sidoo kale khusaysaa carruurta aan ka diiwaan gashanayn xanaanada. Taageerada la bixinayo waxa lagu waafajiyaa baahiyaha ilmaha.

Waxaa jira dugsiyo xanaano dawlad iyo kuwo gaar loo leeyahay labadaba. Waxaad la xiriiri kartaa degmadaada si aad u hesho macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan xuquuqda, codsiga, kharashka waalidka iyo doorashooyinka ka jira bulshadiina.

## WAXBARASHADA DUGSIGA HOOSE IYO TAN DUGSIGA DHEXE (DA'AHA 6–16) AFKA NORWIIJIGA WAXAA LOO YAQAANAA: GRUNNSKOLE

Carruurta iyo dhallinyarada da'doodu u dhaxayso 6-16 waxayna xaq iyo waajibaad u leeyihiin inay galaan waxbarashada dugsiga hoose iyo tan dugsiga dhexe. Ismaamulku waxay bixisa waxbarashada, dugsi hoose iyo dhexe ayna ku heli karaan si bilaash ah dhammaan carruurta. Dugsiyada gaarka loo leeyahay inta badan waxay ardayda ka qaataan lacag.

Carruurtu waxay caadi ahaan bilaabaan dugsiga sanadka ay jirsadaan 6. Dugsiga hoose wuxuu socdaa todoba sano laga bilaabo fasalka 1aad ilaa 7aad. Dugsiga dhexe wuxuu socdaa saddex sano, laga bilaabo fasalka 8aad ilaa 10aad.

Sanad dugsiyeedka sida caadiga ah wuxuu bilaabmaa bartamaha Ogosto wuxuuna dhammaadaa bartamaha Juun. Carruurta iyo dhallinyarada imaada Norway sannad dugsiyeedka, waxa laga qori doonaa dugsi sida ugu dhakhsaha badan.

**Xaqa iyo waajibaadka aad ku dhigan karto dugsiga hoose iyo kan dhexe**
Carruurta iyo dhalinyarada Norway imaadaan waxay xaq u leeyihiin inay dhigtaan dugsiga hoose iyo kan dhexe, haddii ay u badan tahay inay dalka joogi doonaan in ka badan saddex bilood. Degmada waxaa ku waajib ah in ay ilmaha ka qorto dugsiga sida ugu dhaqsaha badan oo aysan ka badneyn hal bil kadib markay soo galaan dalka.

Marka carruurta iyo dhallinyaradu ay degnaadaan Norway saddex bilood, waxaa waajib ku ah inay dhigtaan dugsi hoose ama dhexe ama goob waxbarasho oo la mid ah.

**Qiimaynta iyo darajaynta**
Dugsiga hoose, ardaydu waxay helaan qiimeyno aan loo samaynin buundooyin. Dugsiga dhexe, ardaydu waxay helayaan qiimeyno loo sameeyay iyo kuwo aan loo samaynin buundooyin labaduba.

Buundooyinka dugsiga dhexe waxaa la isticmaalaa marka ardaydu soo codsadaan dugsiga sare. Miisaanka buundada wuxuu ka socdaa 1 ilaa 6, iyadoo 6 uu yahay buundada ugu sareysa ee la gaari karo.

**Barnaamijyada xilliga dugsiga kahor iyo kadib (afka norwiijiga waxaa loo yaqaanaa: SFO)**
SFO waxa lagu bixiyaa labadaba xilliga dugsiga ka hor iyo ka bacdi waxana ay fududaysaa ciyaaraha, dhaqanka iyo madadaalada iyada oo ay kormeerayaan shaqaale aqoon leh. SFO waxay inta badan ka dhacdaa gudaha ama meel la xiriirta dhismaha dugsiga.

Ismaamulada intooda badan waxay siiya SFO dhammaan carruurta fasallada 1-4 iyo carruurta leh baahiyaha gaarka ah ee fasallada 1-7.

Barnaamijyada xilliga dugsiga ka hor iyo kadib waxay fududeeyaan ciyaarta, waxbarashada iyo hawlaha bulsheedka iyo dhaqameedka ee kala duwan iyadoo loo eegayo da'da carruurta iyo heerka waxqabad. Barnaamijku wuxuu kor u qaadaa lahaanshaha iyo saaxiibtinimada, wuxuuna muhiim u yahay horumar ka gaarista caruurta dhanka bulshada, iyo dhaqanka.

Ka qayb qaadashada barnaamijyada xilliga dugsiga ka hor iyo ka dib waa ikhtiyaari. Waxaad la xiriiri kartaa ismaamulkaaga si aad u hesho macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan imaanshaha SFO iyo kharashka waalidka.

## WAXBARASHADA DUGSIGA SARE EE DHALINYARADA (DA'AHA 16-24) AFKA NORWIIJIGA WAXAA LOO YAQAANAA: VIDEREGÅENDE OPPLÆRING

Dhallinyarada ku dhameysatay dugsiga dhexe Norway ama waxbarasho la mid ah oo waddan kale ku soo qaatay, waxay xaq u leeyihiin waxbarasho dugsi sare.

Tani waxay sidoo kale khuseysaa kuwa ku dhameystay waxbarashada dugsiga sare ee waddan kale oo aan loo aqoonsanayn shahaadada jaamacadeed iyo kulliyadda ama shahaado xirfadeedka Norway.

Inta badan ardayda waxay dhigtaan dugsiga sare sanadka ay galaan 16. Codsadayaasha dadka waaweyn ah (25 sano iyo wixii ka weyn) waxay xaq u yeelan karaan waxbarasho dugsi sare oo loo habeeyey si gaar u ah dadka waaweyn.

Xaq u lahaanshaha in lagu diwaan geliyo dugsiga sare, waxay u baahantahay degenaansho Norway oo sharci ah. Dhallinyarada dalka sii jooga inta lagu jiro baaraandegayo codsigooda sharciga deggenaanshiyaha, waxay xaq u leeyihiin inay helaan waxbarasho dugsi sare marka ay da'doodu ka yar tahay 18 sano, waxayna u badan tahay inay dalka joogi doonaan wax ka badan saddex bilood. Dhallinyarada dalka jooga inta ay sugayaan sharciga deggenaanshiyaha in la go'aansado oo 18 jirsado sannadka dhexdiisa, waxay xaq u leeyihiin inay dhammeystaan sannad dugsiyeedka.

**Codsashada dugsiga sare**

Waxbarashada dugsiga sare waxa loo qaybiyaa barnaamijyo waxbarasho guud iyo mid xirfadeed. Sannadka ugu horreeya waxa loo yaqaan “vg1” codsaduhuna wuxuu tilmaamayaa saddexda dookh ee ugu horreeya ee barnaamijyada kala duwan wuxuuna xaq u leeyahay in lagga aqbalo mid ka mid ah. Ardaygu waa inuu codsadaa sannad kasta (vg1, vg2 iyo vg3).

Sida caadiga ah, dhalinyaradu waxay ka codsadaan dugsiga sare gobolka ay ku nool yihiin. Madaxda ismaamulka ayaa mas'uul ka ah bixinta waxbarashada dugsiga sare oo lacag la'aan ah. Waxaa sidoo kale kale jiro dugsiyo madax-bannaan oo inta badan lacag ka qaada ardayda.

Xilliga kama dambaysta ah ee la codsan karo galitaanka dugsiga sare waa Febraayo 1 ama Maarso 1 sannad kasta. Waqtiga kama dambaysta ah ee 1-da Febraayo waxay khusaysaa ardayda dhawaan Norway timid, ee aan ka helin buundooyin dugsi dhexe sabab la xiriirta tababar luqadeed gaar ah ama uqalma in la qiimeeyo shakhsi ahaan codsigooda.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxbarashada dugsiga sare, geedi-socodka codsiga iyo gelitaanka, fadlan la xiriir madaxda ismaamulkaaga ama booqo [www.vilbli.no](http://www.vilbli.no), oo bixiya macluumaad ku qoran luqado kala duwan.

**Barnaamijyada loogu talagalay daraasaadka guud (afka norwiijiga waxaa loo yaqaanaa: studieforberedende utdanningsprogram)**

Barnaamijyada loogu talagalay daraasaadka guud waxay bixiyaan shahaado ogolaanshaha jaamacadeed oo guud ama mid gaar ah. Buundooyinka dugsiga sare waxa la isticmaalaa marka ardaydu soo codsadaan waxbarashada sare ee kulliyadaha iyo jaamacadaha.

Barnaamijyada waxbarashada guud waxay leeyihiin waqti cayiman oo ah saddex sano oo waxbarasho.

Codsadayaashu waxay wax ka dooran karaan barnaamijyada soo socda ee daraasadaha guud:

- Takhasuska waxbarashada guud
- Farshaxanka, naqshadeynta iyo dhismo-naqshadeyn
- Isboortiga iyo waxbarashada jirdhiska
- Muusigga, qoob ka ciyaarka iyo riwaayadaha
- Warbaahinta iyo isgaarsiinta

**Barnaamijyada waxbarashada xirfadeed (afka norwiijiga waxaa loo yaqaanaa: yrkesfaglige utdanningsprogram)**
Barnaamijyada waxbarashada xirfaddu waxay bixiyaan shahaadooyin xirfadeed, oo wata ama aan wadanin shahaado ganacsi ama shahaado lagu shaqaysan karo. Shahaadada xirfadeed waxay qofka siinaysaa shahaadooyinka uu ugu shaqaysan karo xirfada.

Barnaamijyada waxbarashada xirfaddu waxay leeyihiin muddo cayiman oo ah saddex sano oo wax baris fasal ah ama laba sano oo waxbarasho fasalka ah iyo laba sano oo shaqo-barasho shirkad ah. Waxa kale oo suurtogal ah in la iska diwaan geliyo barnaamijka kaabis jaamacad guud ah iyo shahaado gelitaanka kulliyadda.

Codsadayaashu waxa ay kala dooran karaan barnaamijyada waxbarashada xirfadeed ee soo socda:

- Dhismaha guryaha iyo wax dhisida
- Injineernimada korantada iyo tignoolajiyada kombiyuutarka
- Timo-jare, ubaxa, naqshadeynta gudaha iyo meela tafaariiqda
- Daryeelka caafimaadka, kobaca caruurta xilliga xanaanada iyo dhalinyarada
- Farsamada, naqshadaynta iyo horumarinta alaabta
- Tignoolajiyada xogta iyo wax soo si baahinta akhbaaraha
- Beeraha, kalluumaysiga iyo dhir abuurista
- Maqaayada iyo habaynta cuntada
- Wax iibinta, adeegga iyo dalxiiska
- Wax soo saarka tignoolajiyada iyo warshadaha

## XUQUUQDA AY LEEYIHIIN ARDAYDA OO DHAN

Xuquuqahaas waxay khuseeyaan ardayda dhigata dugsiyada hoose/dhexe iyo sare.

**Tabbabarka luuqada gaarka ah**
Ardeyda ku hadla af-hooyo oo aan ahayn norweji ama samii, kuwaas oo aan ku hadlin norweji ama leh xirfadaha luuqada norwiijiga oo liidato, waxay xaq u leeyihiin tababar luuqadeed oo gaar ah. Xaqu waxa uu khuseeyaa ilaa uu luuqada norwejigu u fiicnaado ayna xaadiraan kana faa'iidaystaan waxbarashada caadiga ah.

Tababarka luqadda gaarka ah wuxuu ka kooban yahay tababar dheeraad ah oo luuqada norwejiga ah, wuxuuna sidoo kale ka koobnaan karaa:

- Ku barista afka hooyo ee ardayga
- Waxbarashada laba luqoodlaha ah - oo isku daraysa waxbarida hal ama in ka badan maadooyin norwejiga ah iyo luqadda ardaygu sida fiican u yaqaan

Dugsiga waxaa looga baahan yahay in uu qiimeeyo aqoonta ardayga uu u leeyahay luqadda norwejiga si loo go'aamiyo nooca waxbarashada luqadda gaarka ah ee ku habboon ardayga.

**Taageerada hordhaca ah ee dugsiyada hoose, dhexe iyo sare**
Carruurta iyo dhalinyarada Norway ku cusub, waxay ku heli karaan dhammaan ama qaar ka mid ah waxbarashada kooxo, fasallo ama dugsiyo gaar ah muddo ilaa laba sano ah. Ujeedadu waa in aad si dhakhso ah u barato luqada norwejiga, ka hor inta aadan gelin dugsiyada markasta la tago ama xiisadaha.

Ilmaha/dhallinyarada iyo waalidkiis ama waalidkeeda ama masuuliyiintooda, waa in si fiican loogu wargeliyaa waxa ku jira barnaamijka hordhaca ah, oo ay ogolaadaan gelitaanka barnaamijkan. Ilmaha/dhallinyarada iyo waalidkiis/keeda ama mas'uuliyiintooda, waxay dooran karaan beddelka inay galaan dugsiga caadiga ah ama fasallada.

**Waxbarashada gaarka ah**
Ardayda aan si ku filan uga faa'iidaysan waxbarashada caadiga ah, waxay xaq u yeelan karaan waxbarashada gaarka ah. Waxbarashada gaarka ah waxay la macno noqon kartaa in ardaygu ka shaqeeyo ujeedooyinka waxbarasho ee gaarka ah, in macalinka ama kaaliyaha uu kormeero oo uu caawiyo ardayga fasalka dhexdiisa ama ardayga la siiyo qalab gaar ah oo diyaarsan. Waxbarashada gaarka ah waxaa la waafajiyaa baahida gaarka ah ee ardayga.

**Deegaan waxbarasho oo amaan qabo oona wanaagsan**
Dhammaan ardaydu waxay xaq u leeyihiin inay helaan deegaan waxbarasho oo ammaan ah oona wanaagsan korna u qaada caafimaad wanaaga, fayoobida iyo waxbarashada. Waa waayo-aragnimada ardayga ee jawiga dugsiga ee muhiimka ah. Dhammaan ardaydu waa inay dareemaan inay ka tirsan yihiin. Waa mas'uuliyadda dugsiga inuu ka hortago cagajuglaynta iyo dhaqamada kale ee waxyeelada leh. Dugsiga waxa looga baahan yahay in uu la socdo xaalada uuna fuliyo talaabooyinka haddi ardaygu aanu ku dareemayn badqab ama fayoobi dugsiga.

**Iskaashiga ka dhexeeya dugsiga iyo guriga**
Iskaashiga ka dhexeeya dugsiga, ardayga iyo waalidka ama mas'uuliyiinta waa muhiim. Tani waxay ka caawinaysaa dugsiga inuu sida ugu fiican u taageero ardayga oo ka qaybqaata kobaca wanaagsan ee tacliinta iyo bulshada.

Waalidiinta ama mas'uulyiinta waxaa ku waajib ah inay ka qayb galaan wadahadalka horumarinta dugsiga iyo ilmaha, iyo shirarka waalidka ee dhammaan waalidiinta fasalka ama kooxda uu ilmuhu ka tirsan yahay.

Waalidiinta ama masuuliyiinta waxa mar walba lagu soo dhawaynayaa inay la xidhiidhaan dugsiga wixii su'aalo ah ama walaac ah oo ku saabsan waxbarashada iyo horumarka ilmahooda.

Utdannings-
direktoratet